Gillette Children's
Specialty Healthcare

200 University Ave. E
St. Paul, MN 55101
651-291-2848
800-719-4040
(telefoon bilaa lacag ah)
www.gillettechildrens.org

## Ila soo xidhiidh

**Su'aalo Degdeg ah Ama cabashooyin**
Telefoonka caafimaad ee Kalkaalinta
651-229-3890

**Su'aalo Kale Oo ku saabsan Daryeelkaaga**
Rugta bukaanka St. Paul:
Khadka Wicitaanka Kalkaalisada
651-578-5000

Bukaanada jooga Goobaha Kale:
Kala xidhiidh lambarka Kooxdaada daryeel caafimaad Gillette.

**Ballamo**
651-290-8707

## Buugaag, DVD-yo iyo kabadan

Raadi qalabka ku saabsan

Naafada, xaaladaha caafimaad

Iyo taageerada daryeel bixiyaha.

**Khayraadada caafimaad iyo Waxbarasho**
dhismaha jaamacadda St. Paul, ee u dhaw dabaqa afaraad skyway
**651-229-3938**
hre@gillettechildrens.com

# Xirmada Alaabta Caafimaadka ee Lagu Ciyaaro Warbixin waalidka loogu talagalay

**Medical Play Kit: Information for Parents | Somali**

*waxbarashada bukaanka*
*SRI035-SO*

Waxaan kuu siinay alaabtan caafimaadka ee lagu ciyaaro si aad canugaaga uga caawiso si uu u ogaado waxyaalo badan oo cusbitaallada ku saabsan ka hor inta aan la keenin Gillette Children's Specialty Healthcare. Marka canugu wax ka ogyahay sida ay cusbitaaladu yihiin waxay ka caawin kartaa in ay canuga ka yareyso cabsidii uu ka qabi lahaa aadidda cusbitaalka. Xirmada Alaabta caafimaadka ee lagu ciyaaro waxaa ku jira qaar ka mid ah waxyaalaha uu canugu cusbitaalka ku isticmaali doono kuna arki doono. Waxaa kale oo aan xirmada ku soo darnay liis buugaag ah oo aad ka heli karto maktabada.

Hadii dadka waaweyn ay ka welwelaan qaliinka, bal ka fakir sida canug yar uu dareemi karo. U xaqiiji canugaada marka horeba in aysan cusbitaalka kaligood ku noqoneynin iyo in ay guriga ku soo noqon doonaan. Adiga iyo shaqalaha cusbitaalkaba ayaa u taagnaan doona in ay caawiyaan. Adiga ayaa ka yaqaana ilmahaaga dadka kale oo dhan. U isticmaal aqoontaas sidii aad ugu dhiiri gelin lahayd in uu canugu kuu sheego cabsidiisa iyo waxa uu dareensan yahay.

- Ilmaha saanqaadka ah iyo kuwa iskuulka aan weli gaarin waxay si wanaagsan u fahmi karaan hadii loo sheego cusbitaal seexinta hal ilaa sadex maalmood ka hor. Ma xusuusan karaan waxyaalaha loo sheego waqti hore. Caruurta da'daan ku jirta waxay ka welwelaan cidlada/keli ahaanshada, iyo in aysan guriga dib ugu soo laaban doonin iyo in sababta waxaan loo sameynayo ay tahay in la ciqaabayo. "waxaan sameeyey wax xun, sidaas darteed ayaa cusbitaalka la iikeenay." U xaqiiji in aanan la ciqaabeynin.
- Caruurta iskuulka gaartay (shan sano jirka ka weyn) waxay u baahan yihiin in ay sii ogaadaan ugu yaraan hal usbuuc ka hor waqtiga balanta. Sidan waxay siineysaa waqti ay uga fikiraan waxyaalaha loo sheegay iyo in ay su'aalo weydiiyaan. Caruurta da'da iskuulka lagu dhigta jira (shan jirka ka weyn) sida badan waxay ka cabsadaan suuxinta waxayna u baahan yihiin in loo xaqiijiyo in ay suuxdinta ka soo toosi doonaan marka qaliinku dhamaado kadib.
- Da' yarta waa in sida ugu dhaqsiyaha badan loogu sheegaa. Caruurta da'daan ku jirta waxay si wanaagsan wax u fahmi karaan marka la siiyo fursad ay howlahooda ku qorsheystaan go'aannana uga dhiibtaan cusbitaalka joogistiisa. Waxaa kale oo ay u baahan yihiin in loo xaqiijiyo in la siin doono xoriyad arimahooda gaarka ah oo badan, sida in daaha sariirta loogu daboolo iyo loo ogolaado in ay waxa ay rabaan ay sheegtaan.

Marka ay caruurtu si dhab ah u fahansan yihiin waxa la sameyn doono, welwelka ayaa ka yaraada, waxayna noqdaan kuwo ogol in ay sameeyaan waxyaalaha loo baahan yahay kana yareeya guriga dhibka ka hor inta aan cusbitaalka la seexin iyo kadibba. Hadii aad qabtid su'aalo gooni ah oo dheeraad ah oo ku saabsan sidii aad canugaaga ugu diyaarin lahayd keenidda cusbitaalka, fadlan ka wac shaqaalaha hab-dhaqanka caruurta telefoonkan 651- 229-3855.

*Socda bogga xiga*

## Xirmada alaabta caafimaadka ee lagu ciyaaro

Waxyaalahan soo socda waa liiska waxyaalaha xirmadan ku jira iyo warbixinno ku saabsan waxyaalaha. Hadii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan waxyaalaha xirmadan ku jira ama sidii aad canugaaga ugu diyaarin lahayd qaliinka, fadlan ka wac khubarada maaweelada caruurta talefoonkan 651-229-3855.

## Waxyaalaha Ku Jira

| | |
|---|---|
| Buuga kalar marinta ee Cusbitaalka: | Buugan wuxuu siinayaa canuga warbixin aasaasi ah oo cusbitaalka ku saabsan |
| Sawir qol cusbitaalka ah: | Canugaaga wuxuu joogi doonaa qol la mid ah qolkan. |
| Sawir jirka aadanaha ah: | Waxaad weydiin kartaa canugaaga meesha uu u maleynayo jirkiisa in qaliinka looga sameynayo iyo sababta qaliinka. Sidan waxay ku fiican tahay waxaad ku ogaaneysaa waxa uu canugu ka ogyahay cusbitaalka la seexin doono. |
| Calaamada gacanta lagu xiro: | Canugaaga magaciisa ayaa ku qornaan doona ca laamadan cadeynta ah inta uu cusbitaalka joogo. Gacanta ama qoobka midkood ayaa calaamada lagu xiri doonaa. |
| Koofiyadda afka iyo sanka daboosha ee qaliinka : | Sida badan midabkodu waa buluug, waxaana isticmaala dadka ka shaqeeya qaliinka si ay jeermiskooda dadka uga dhowraan. |
| EKG Pad (qalab garaaca Wadnaha gudbiya): | Ugu yaraan sadex sheygan ah ayaa canugaaga lagu dhejin doonaa (labo feeraha ah iyo mid caloosha ah) si loola socdo heerka garaaca wadnaha. |
| Faashad: | Waxaa loo isticmaali karaa in lagu qalajiyo maqaarka/jirka ama waxaa loo isticmaalaa sida sharooto oo kale. Sharooto caadi ah xitaa waa ay la socotaa xirmada. |
| Faashad aalkolo leh: | Waxaa loo isticmaalaa in lagu tirtiro jirka. Urka/ urta aalkolada waa ka caadi cusbitaalada. |
| Galoofiska caaga ah: | Dad badan oo cusbitaalka ka shaqeeya ayaa isticmaala si ay qalabka nadiif u ahaan geermisna aysan u yeelan. |

Canugaagu wuu ku faraxsanaan doonaa ku ciyaaridda waxyaalahan kaligiis ama isaga oo boombale isaga dhigaya dhakhtar ama kalkaaliso/kalkaaliye caafmaad

Hadii aad heleyso kumbiyuutar internet leh, waxaad iyada oo muuqaal ah ku wareegi kartaa Gillette Children's Specialty Healthcare adiga oo ka booqanaya www.gillettechildrens.org

## Liiska Buugta

W Adiga iyo canugaaga hadii aad wadajir u aqrisaan si aad wax uga ogaataan gelidda cusbitaalka waa qaab aad u fiican. Si aad u heshid fikrado kale, la hadal maktabada xaafadaada oo weydiiso liiskan buugaagta ku qoran

*Socda bogga xiga*

**Ilmaha saanqaadka ah iyo kuwa iskuulka aan weli gaarin**

- Hautzig, D. and M. A Visit to the Sesame Street Hospital. Random House, 1985.
- Rogers, F. Going to the Hospital, Putnam. 1988.

**Caruurta iskuulka gaartay**

- Banks, A. Hospital Journey, A Kids Guide to a Strange Place. Puffin Books, 1989.
- Hogan, P. and K. The Hospital Scares Me. Raintree Publications, 1980.
- Howe, J. The Hospital Book. Beech Tree, 1994.
- Reit, S. Jenny's in the Hospital. Golden Book, 1984.

**Da' yarta**

- Richter, E. The Teenage Hospital Experience.
- Coward, M. and G. You Can Handle It. 1982.

**Dareenka walaalaha kale ee cusbitaal dhigidda ku wajahan**

Wiilasha iyo gabdhaha la dhashay canuga cusbitaalka la dhigayo waxay u baahan yihiin in iyagana loo sii diyaariyo in walaalkood ama walaashood cusbitaalka la dhigayo. In loo sheego in iyagana la daryeeli doono iyo in loo sii sheego cidda ay la sii joogi doonaan iyo marka ay cusbitaalka yimaadaan waxa ay arki doonaan marka ay walaalkood ama walaashood soo booqanayaan, sidaas sameynteeda waxay ilmaha u fududeyneysaa in ay fahmaan una dulqaataan duruufta. Shaqaalaha Hab-dhaqanka Caruurta ayaa xitaa diyaar kuu ah si ay uga caawiyaan walaalaha kale in ay duruufta la soo deristay fahmaan una dulqaataan, wac talefoonkan 651-229-3855 si aad warbixin dheeraad ah u heshid.

- Peterkin, A. What about Me? When Brothers and Sisters get Sick. Magination Press, 1992.

Macluumaadkan waxa loo isticmaalayaa ujeeddooyin waxbarasho oo kaliya. Looguma talogalin in lagu beddelo talada bixiyayaashaada daryeel caafimaad.
Haddii aad qabto wax su'aalo ah, la hadal dhakhtarkaaga ama ciddii kale ee kooxda daryeelka caafimaadkaaga.